

XAQIIQOYINKA KU SAABSAN DHALINTA IY MARIJUANA

Halkan waxa ku xusan war wanaagsan (hadana la yaab leh): Marka ay noqoto warbixin lagu kalsoonaan karo oo ku saabsan marijuana iyo maandooriyaha kale, dhalintu waxa ay eegaan waaldiiintooda iyo dadka waaweyn ee lagu kalsoonaan karo noloshooda.

Sidoo kale halkan waxa ku xusan warar kasii wanaagsan: **Waan ognahay in la hadalka dhalinyaradu uu waxtar leeyahay.** Ha ahaato gaari gudiihiis, xilliga cashada, ama socod xaafada dariska lagu tagaayo, markii aad kala hadashid isticmaalka marijuana dhalintaada, wey ku dhageysanayaan.

Waxa ay qabi doonaan su'aalo, waxaadna ka garanaysaa waayo aragnimadaada in aad ubaahantahay in aad hesho jawaabo.

Marka, sidee marijuana u saameeyaa dhalinyarada?

1

Marijuana waxa uu dhaawici karaa darajooinkooda. Carruurtu marka ay cunaan mariijuana waxa uu badali karaa qaabka maskaxda dhalintu ukorto waxa ayna ku yeelan kartaa saameyn daba dheeraata xaga xusuusta, waxbarashada, iyo garaadka.

2

Marijuana la qabsigeedu waxa uu ku badanyahay dhalinta marka loo eego dadka waweyn. Gudaha Washington, dhalinta inta ugu badan ee gala barnaamijyada la tacaalida daroogada waxay sheegaan in marijuana ay tahay daroogada ugu weyn ee ay isticmaalaan.

3

Isticmaalka marijuana waxa ay saaemayn kartaa isku duwidda iyo wakhtiga falcelinta waxana lala xiriiriyyaa shilal dhimasho badan sababa gudaha Washington, gaar ahaan marka lagu qaso maandooriyeaal kale.

4

Isticmaalka marijuana waxa ay kugu hogaamin kartaa dabeeecad aan la saadaalin Karin iyo go'aan qaadasho xun taas oo uhorseedi karta isticmaalaha iyo dadka kalaba wado waxyeelo leh.

5

Waxa ay ka hor imaanaysaa sharciga in dadka ka yar 21 ay isticmaalaan marijuana. Sharcigan inta badan si sinaan la'aan ah ayaa loo dhaqan geliyaa ka fagaanshaha isticmaalka marijuana waxa uu ka ilaalin karaa dhalinta isdhixgalka ay la yeeshaan ha'adaha dhaqangelinta sharciga iyo nidaamka sharciga dambiyada. Qabashada iyo ceebeynta la xiriirta waxay saameyn kartaa awooda shaqo helida mustaqbalka ama helida kaalmo dhaqaalo ee kuleejka.



Hadda waxad heshay xaqiilooyin, **kala hadal dhalintaada khataraha suurto gal ka ah ee isticmaalka marijuana.** Cadee xeerarkaaga iyo filashooinkaaga. Usheeg in aad caawinayso.

Wixii warbixin dheeraad ah iyo si aad ubaratid wax badan oo ku saabsan xaqiilooyinka, booqo **StartTalkingNow.org**. Haddii dhallaankaagu rabo in uu wax badan ka ogado sameynta doorashooyin caafimaadka, waxay eegi karaan **YouCanWA.org**.

Haddii dhalintaadu uu dareemo in uu aad ugu faraxsanyahay la hadalka ilmaha asaasaagiis ah, waxaa jira khad caawinaad sir ah oo ay ka shaqeeyaa dhalinyaro tababarani. Kudhiiri geli dhalintaada in ay wacaan, qoraal uqoraan, ama ay la sheekystaan **1-866-TEENLINK (833-6546)**.

Haddii aad u maleyneysid in dhalintaadu ay ku dhibanyihii isticmaalka marijuana ama maandooriyaha kale, la xiriir dhakhtarkooda ama wac **Washington Recovery Help Line 1-866-789-1511**.